Northwards Housing
North Manchester's Council Homes
www.northwardshousing.co.uk

KU SOO DHOWOW
IJAARASHADAADA HORUDHACA

Gurigaaga

Mudada kiradaada ku meel gaarka
Tilmaamaha ijaartayaasha cusub

Ku soo –dhawow gurigaaga cusub
Ijaarte ahaan waxaad leedahay xuquuq iyo waxaana ku saaran mas'uuliyad. Annagana sidaas la mid. Heshiiska cusub ee ijarashadaada baa cadaynaya xeerarka oo dhan.

Xeerarkaani waxay xaqiijinayaan inaad ku raaxaysatid faa'idada ijaarashadaada oo dhan. Waxaa naga go'an inaan ka difaacno adiga iyo jaaliyadaadaba darxumo iyo dabeecad bulshada u daran. Waxaan hubnaa inaad doonaysid inaad na caawintid.

Sidaas daraadeed, waxaan siinaa ijaartaha cusub waqti tijaabo ah si loo tuso sidii ay ula qabsan lahaayeen heshiiska ijaarka, xanaanaynta gurigooda iyo inayna ku noqon rabsho deriska.

Waqtigaan tijaabada ah waa mudada hordhac ah ee ijaarashada.

Mudada hordhac ah ee ijaarashada
Hadii aad tahay ijaarte cusub waa inaad saxiixdaa heshiis hordhac ah ee ijaarka ka hor intii aanad gurigaaga u soo guurin. Haddii ayna dhicin wax dhibaato markii ay dhamaato mudada hordhaca ah ee ijaarka, waxaad si ootoomaatika ah u noqonaysaa ijaarte dhab ah – taasoo ku siinaysa xuquuqda dhan ee ijaarashada guri koonsol ah. Waxaan rajaynaynaa mudada hordhaca ah ee ijaarashadaada inay noqoto mid dhibaato la'aan ah iyo inaad u gudubtid ijaarte dhab ah. Waxaan markasta u dadaalaynaa inaan ku caawino haddii aad wax dhibaatooyin ah la kulantid. Laakiin waa inaad ogaatid waxa dhicidoona haddii aad jabisid heshiiska ijaarashada – warqadaan daabacan baa kuu sheegaysa.

Ijaarasho kala duwan
Waxaa jira labo nooco oo ijaarash:

- Hordhac
- Dhab ah

Waxaad ku bilaabaysaa ijaarka hordhaca ah. Tani macnaheedu waa ma lihid xuquuqda dhan ee ijaarashada dhab ah, waana lagaa saarikaraa guriga si dhaqso ah oo sahal ah haddii aad jabisid heshiiska ijaarashada.

Xuquuqda
Haddii aad tahay ijaarte hordhac ah sharcigu kuma siinayo: gadasho gurigaaga; soo galin kuwo ijaar kaa siiya; sii ijaarid qayb guriga ka mid ah; ku samayn hagaajin ama ka badalasho gurigaaga ijaarte kale.

Laakiin inkastoo aanad lahayn xuquuq ootomaatika ah ee arrimahaan (sida uu u leeyahay ijaartaha dhabta ah), waxaad awoodaa inaad waydiisatid ogolaansho inaad soo galisid dad ijaar ku siiya, inaan hagaajisid gurigaaga ama inaad badalatid. Waa go'aamin doonaa haddii aad sidaas ku dhaqaaqi kartid.

Haddii dhibaatooyin jiraan

Dadka inta badan waxay si fudud ka gudbaan ijaarte horhdac ah oo u gudbaan mid dhab ah. Laakiin waxaan qaadaynaa talaabo lid kugu ah si dhaqso ah haddii aad jabisid heshiiska ijaarkaaga. Waxaan markasta baaraynaa marka hore inaan aragno bal haddii arrrimaha la xalinkaro – laakiin haddii mushkiladu darantahay ama haddii aanad iskaashi nala samayn dadaalkayaga si xali loo helo; waxaan qaadidoonaa tilaabo sharci ah si si toos ah lagaaga saaro guriga.

Ijaarka
Heshiiska ijaarashadaadu wuxuu sheegayaa inay waajib kugu tahay innad bixisid ijaarka iyo inaad ku bixisid waqtiga loo gooyey. Haddii aad dib ugala dhacdid labo usbuuc, waan kula soo xiriiraynaa. Waxaan baaridoonaa inaad heshid deeqaha saxaha ah iyo inaad samaysid heshiis sidii aad u bixinlahayd in lacag joogto ah oo ka siyaado ijaarkaaga usbuucii. Laakiin waxaan qaadaynaa tilaabo sharci ah si guriga lagaaga saaro haddii haraagu isku gaaro shan usbuuc – ama xataa ka hor xaaladaha qarkood. Waxaa sidokale qaadaynaa tilaabo haddii aad tahay mid si joogto ah ula daahaya bixinta ama haddii aad dhawrin habkii dib u bixinta.

Dabeecad bulshada u daran
Waa inaan difaacnaa jaaliyadaada iyo gurigaaga. Sidaas daraadeed Haddii qof noo soo sheego inaad u dhaqmaysid si u xun bulshada, waan baaridoonaa cabashada geebi-ahaanba – aruurinta cadayn, waraysi maragyada iyo la hadlida booliiska. Haddii tani cadayso in cabashadu lagu qancikaro, waxaan qaadaynaa tilaabo. Haddii dhibaato aad u yartahay waxaan kuu sheegidoonaa inaad

badashid dhaqankaaga - waxaa kaloo dhicikarta inaan keeno khabiir dhexdheexaadinta.

Laakiin Haddii aanad iskaashi yeelan ama haddii afcaashaadu ay yihiin kuwo u xun bulshada(sida rabshad ama hagardaamo jinsiyey), ma helikartid fursad labaad. Waxaan isla markaas qaaday tilaabo si lagaaga saaro guriga.

Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado inaad mas'uul ka ahayn oo kaliya dhaqankaaga…Waxaan qaadaynaa tilaabo lid kugu ah haddii dambiga u xun bulshada uu galo qof adiga kula nool ama gurigaaga booqasho u yimid, mana aha muhiin meesha darxumadu ka dhacday – gurigaaga dhexdisa, dibadiisa ama meelkasta ee degaanka ah.

Xaalado kale
Waxaa dhicikara xaalado kale oo aan oo doonayno in lagu saaro – tusaale ahaan adigoon gurigaaga u isticmalin degaankaaga aasaasiga ah. Heshiiska ijaarkaaga baa cadaynaya xaalahaas oo dhan.

Waxaa kale oo suurtogal ah inaan baahanno in lagaa raro guriga sababtoo ah inuu gurigu u baahanyahay dhismo mudiim ah ama dayactir ama sababtoo ah in la duminayo. Laakiin xaaladaas, waxaan ku siinaynaa guri kale oo haboon.

Tilaabo qaadida
Haddii aan rabno inaan saarno ijaarte dhab ah(sabab inayna bixinayn ijaarkooda ama rabshayaan deriskooda tusaale ahaan) waa inaan siinaa ayaga fursad inay u soo gudbiyaan qisada doocdooda dhagaysiga maxkamada. Waxay markaas ku xirantahay qaaliga inuu xukumo haddii saaridu hor u soconayso.

Laakiin haddii aan saarayno ijaarte hordhac ah, waa u suubinkarnaa si fudud oo dhaqso ah.

Dib-u-eegida
Qoraal baan kugu soo sheegidoonaa inaan aadayno maxkamad si laguu saaro. Waxaad codsankartaa dib-u-eegid arrinta, laakiin waa inaad ku samaysid arrintaan 14 beri dhexdood.

Shaqaalaha baa eegidoona xaalada mar labaad si ay u ogaadan haddii wax walba loo qabtan si sax ah. Mid ka mid ah kuma lug lahayn arrinta markii hore.

Haddii ay waafaqaan in saaridu hor u socoto, awood uma lihid inaad rafcaan u qaadatid cid kale. Inkastoo aan u baahannahay wali inaan maxkamada ka codsano ogolaansho kama dambays ah, saaridu waxay u dhacaysaa si ootomaatik ah intii aan raacayno hab quman.

Latalin

Haddii aan qaadano tilaabo sida tan, waxaad ka helikartaa latalin xafiiska latalinta muwaadinka, xarumaha sharciga, xarunta latalinta guriyeynta ama garyaqaan.

Noqosho ijaarte dhab ah
Haddii ayna jirin dhibaatooyin mudada hordhaca ijaarka dhexdeeda waxaad si ootomaatik ah u noqonaysaa ijaarte dhab ah taariikhda ku qoran wajiga kore ee heshiiska ijaarashada. Waxaan kugu soo sheegayna qoraal markii tani dhacdo.

Waa kan caawinaad
Warqadaan yar ee daabacan waxay kuu sheegaysaa waxa dhacaya haddii ay jirto dhibaatooyin mudada hordhaca ijaarashadaada. Tani waxay ku tusaysaa inay dhab nagatahay aruurinta ijaarka iyo ka difaacida dadka dhaqanka u xun bulshada. Laakiin qiyaastii mid kasta ee mudada hordhaca ijaarashada aad buu mas'uul u yahay, wuxuuna u gudbaa ijaarte dhab ah dhibaato la'aan.

Waa dhab, haddii aad tahay ijaarte mudo hordhac ah, waxaad helaysaa difaac la mid ah mida uu helayo ijaartaha dhabta ah . Haddii aad tahay dhibane qof kale dhaqan xumadiisa waqtigaaga tijaabada dhexdiisa, waxaa ku caawini doonaa si la mid ah haddii aad ku noolaan lahayd guri koonsol ah noloshaada oo dhan.

Haddii aad qabtid walwalo kasta oo la xiriira ijaarashadaada ama qayb kasta ee adeegyada guriyeynta nagalo soo xiriir teleefoon 0161 953 2662.